

Degmada San Diego

Hagaha Dabaalgeda Thanksgiving inta lagu jiro Faafida COVID-19

Si loo yareeyo faafida COVID-19 loo xaqiijiyo in qoysaskubadqabaan inta lagu jiro Dabaalgeda fasaxa Thanksgiving, Degmada San Diego waxay bixinaysaa hagdii oo loogu talagalay waxqabayada ugu badan ee la sameeyo:

Waxqabadyada Thanksgiving

Lagu taliyey

- Munaasabadaha kala fog ee lalamsameeyo qoyska iyo assxaabta, sida casho Thanksgiving oo sheeda ah, wadaaga habka cunto sameynta, digaagad duur oo sheeda ah, ama cayaar qadka oo toos ah.
- Munaasabad teleefishika laga siidaayey ama qulqulato toos oo guriga ah ay ku jiraan xubnaha reerkaaga.
- Beeraha banaanka, suuqyada cuntada, iyo farshaxanka carwooyinka halkaasoo [hagaha gobolka](#) laga raacaayo oo dadku isticmaalaan [jeermisdile](#), [xiranayaan weji daboole](#), oo ay xoojinayaan kala fogaansho ilaa 6 dhudhun u jirta dadka kale.
- Qaado talaalka hargabkasi aad isuga hortagto una yareyso caqabadaha kaaga imanaya fayraska hargabka ama COVID-19.

Aan Lagu talinin

- Xarumo [kasta loogu talagalay Xakameynta iyo Kahortaga Cudurada \(CDC\) tixgelinta socdaalka](#), socdaalka waxa uu kordhiyaa fursada uu COVID-19 ku kordhayo kuna faafayo. Gurigoo la joogo ayaa ah sida ugu wanaagsan aad uga hortagi karto naftaada iyo dadka kale.
- Ka qeybgalka shaqsi ahaan munaasabadaha isboortiyada, dhoolatuska, iyo filimada halkaasoo in ka badan 3 reer xadir ku yihiin.
- Shaqsi ahaan Black Friday ama adeegashada munaasabadaha kale halkaasoo ay jiri karaan isu imaatin weynoo shaqsiyaal ah.

Lama Oggola

- Waax [kasta ee hagaha \(CDPH\) Caafimaadka Dadweynaha California](#), munaasabadaha shaqsiyaal ah ama xafladaha in ka badan 3 reer lama oggola, xittaa haddii ay sameeyaan banaanka. Xusuusnow, intey tirada dadku yar yihiin, oo isu imaatinku gaaban yahay ayey badbaadadu badan tahay.
- Meerijaanada, dabaalgeda iyo baashaalka tooska ah lama oggola sababtoo ah isdhexgalka aadka isugu dhow wuxuu siyaadiyaa halista caabuqa.
- Shaqsi ahaan digaagad duureedka ama munaasabadaha la midka ah lama oggola sida ay uga baahan yihiin kasoo qeybgalayaasha ku socod maraya ama ordaya dhowaansho dhow, wayna adag tahay in la adkeeyo kala fogaanshahajireed.

Si kaloo Ka badbaado roon

Waxqabadyada dhaqanka Thanksgiving oo badan ayaa wuxuu noqon karaa halista faafida fayraska oo sarreysa. Waxaa jira siyaabo kale oo ka badbaado roon oo lagu dabaaldegoo waxayna isugu jiraan sidansoo socota:

- Ku dir casho sheeda laga xiriirayo toos wicitaan fiidiyow ama fiidiyow la wadaagayo, dirista casho Thanksgiving horey loo sameeyey ama maadooyinka toos qadka onlaynka adeegyo raashiin gaarsiin oo si wadajir ah ugu cuna sheeda
- Qadka toos uga adeego bedelkii shaqsi ahaan Black Friday heshiis ahaan laheyd.
- Ku deeq cunto sadaqooyinka bakhaaradda gaariga adigoo saaran laguugu adeego, ama toos qadka lacag ururinta kaydka bankiga cuntada.
- U dabaaldeg [Green Friday](#) adigoo booqanaya beerta nasiinyada xaafada ama ilaalinaya waxqabadyada qoyska asxaabada isu ah.
- Booqo badeecadaada beerta laga soo saaray oo [raaceysa Waaxda California ee Hagida Cuntada iyo](#) beeraha.

Tallaabooyinka Kahortaga Shaqsiyanka ah

Si kasta aad ugu dabaaldegeyso, fadlan sii wad inaad raacdo [amarka Caafimaadka Dadweynaha Degmada San Diego](#), [Waaxda Hagaha CDPH California ee Hagaha Caafimaadka Dadweynaha](#), iyo [Hagaha Thanksgiving CDC](#). Si loo badbaado inta lagu jiro xilliga fasaxa Thanksgiving 2020, fadlan xusuusnow inaad:

- Dhaqdo ama jeermistirto gacmahaaga badanaa, oo si joogto ah u nadiifi walxaha la taabto markasta.
- Ka fogow isu dhowaansha ka joog ugu yaraan 6 dhudhun in u jirta dadka kale oo aan qeyb ka aheyn qoyskaaga.
- Ka fogow meelaha guddaha ah oo aan kuu oggolaaneen kala fogaansho fudud oo ugu yaraan dhan 6 dhudhun oo u dhexeysa [adiga iyo dadka](#) kale oo raac hagaha gobolka ee isu imaanshaha meel gudaha ah ugu yaraan ilaa 3 reerood.
- Si sax ah u xiro [weji daboolmunaasab ah](#) oo daboolaya afkaaga iyo sanakaaga markaad joogto meel banaanka ka ah gurigaaga dad kale joogaan oo aan reerkaaga aheyn.
- Gurigaaga joog oo dadka kale ka fogow haddaad xanuunsan tahay, aad qabto callaamadaha COVID-19, ama aad la xiriirtay qof la jiran ama qaba calaamadaha COVID-19.
- Raac tilmaamaha haddii laguugu taliyo inaad [isgo'doomiso ama aad iskarantiisho](#).

Wixii su'aalo ah, fadlan la xiriir SafeReopeningComplianceTeam@sdcounty.ca.gov.



La casriyeeey 11-18-2020